**FAAFINTA** **RASMIGA**

الجريدة الرسمية

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية ارض بونت الصومال

**Sanadka 9-aad. Garowe 15. August. 2007** **Lam. 8**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدةالشهرية

*Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland*

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

---

# TUSMADA


## Qeybta Koowaad

## Sharci

## Qeybta labaad

## Xeer

Waxba ma leh

## Qeybta Saddexaad

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**

*Sharci Lr. 10. ee 15/08/2007, kuna saabsan Qaanuunka Heshiisk Is-afgaradka(MOU) ee wada shaqeynta DGPL iyo Hay'addaha Qaramada Midoobay (UN). Bogga.* 0137-143

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIYA** | **PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

**Xafiiska Madaxweynaha** | **Office of the President**

---

**Sharci Lr.10 ee 11/08/2007, kuna saabsan Sharciga Heshiiska Is-afgaradka (MOU) ee Wada Shaqeynta DGPL iyo Hay'adaha Qaramada Midoobay (UN).**

Madaxweynuhu

**Markuu arkay** : Dastuurka DGPL qodobkiisa 54-aad faqradiisa 14-aad.

**Markuu arkay** : Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/081/2007 ee 08/07/2007.

**Markuu Garowsaday** : Ansixinta Sharcigan ee Golaha Wakiilada.

**Wuxuu soo saaray**

**Sharcigan soo socda:-**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen sida kor ku cad qaanuunka Heshiiska Is-afgarada (MOU) ee wada shaqeynta DGPL iyo Hay'addaha Qaramada Midoobay (UN).

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah waa la kaydinayaa..

**Qodobka 3-aad**

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu qaanuunkani faafinta rasmiga ah ee dawlada ku soo baxay, kaasoo kamid noqonaya qawaaniinta Dawlada, cidkastana waa jib ayey ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

Wabilaahi Towfiiq

Mudane Maxmuud Muuse Xirsi

Madaxweynaha Dowlada

0137

**DAWLAD G. PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

Golaha Wakiillada

**PUNTLAND STATE**
**OF SOMALIA**

Representative Council

**Xafiiska Guddoomiyaha**

*Ref:-* XGGW/DGPL/ 81 /2007

**08/07/2007**

Ku:- Madaxweynaha DGPL

Garoowe

Ujeeddo:- **Ansixinta Heshiiska Is-afgarad (MOU) ee Wada Shaqeynta DGPL & Hay'adaha Qaramada Midoobay UN**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DGPL |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Golaha Xukuumadda ee Heshiiska Is-afgarad (**MOU**) ee Wada Shaqeynta DGPL & Hay'adaha Qaramada Midoobay **UN** |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahidda loo qabo Xeerkan |
| MARKUU DHEGEYSTAY :- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada DGPL |
| MARKUU ARKAY:- | Ansixinta Golaha Wakiillada DGPL |

**Wuxuu Guddoomiyey:-**

Ansixinta Heshiiska Is-afgarad (**MOU**) ee Wada Shaqeynta DGPL & Hay'adaha Qaramada Midoobay **UN**

**Wabillaahi Towfiiq**

**Axmed Cali Xaashi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DGPL**

GOLAHA WAKIILLADA DGPL PUNTLAND

**XEERKA WADA SHAQAYNTA DAWLAD GOBALEEDKA PUNTLAND IYO HAY'ADAHA QARAMADA MIDOOBEY**

***(MEMORANDUM OF UNDERSTANDING "MOU" BETWEEN PUNTLAND GOVERNMENT AND UN AGENCIES)***

**Dawlad Gobaleedka Puntland ee Somaaliyeed isagoo tixgalinaya:**

- Axdiga Qaramada Midoobey
- Heshiiska mudnaanta gaar ahaaneed iyo xasaanadaha Qaramada Midoobey
- Heshiiska mudnaanta gaar ahaaneed iyo xasaanadaha qaramada midoobey ee mudan in la qaddariyo
- Heshiisyada Dalka soomaaliyeed
- Xuquuqda aadamiga ee caalamka iyo sharciga samafalka
- Iyo xeerarka kale ee heshiisyada mudnaanta gaar ahaaneed, xasaanadaha iyo Tafsiilaadka ku haboon mabaadii'da dukuumentiga shaqada xukumaysa xiriirka ka dhexeeya qaramada midoobey iyo Dowladda Gobaleedka Puntland

Dawlad Gobaleedka Puntland waxay balan qaadaysaa sii-wadidda, dhowrida iyo kaalinta heshiisyada iyo xeerarka kor ku xusan.

Waxaa lagama maarmaan ah in qaramada midoobey & Dowlad Gobaleedka Puntland ay wada jir u samaystaan xeerka wada shaqaynta oo dhammaystiran oo Hay,ada qaramada midoobey kaga howl-galaan Puntland.

Dowlad Gobaleedka Puntland waxay dhowraysaa mas'uuliyada asaasiga ee sharciga caalamiga oo lagu ilaalinayo xuquuqda aadamiga bulshada ku hoos nool xuduudaha Maamulka Dowladda gaar ahaan hubinta ammaankooda iyo waddada asaasiga ee lagama maarmaanka u ah gaarsiinta waxyaabaha aasaasiga u ah nolosha sida, Cuntada, Hoyga, Biyaha, Caafimaadka iyo Waxbarashada.

Kaalinta Hay'adaha Qaramada Midoobey ee ku sugan Puntland waxay gacan ka siinayaan Maamulka u gargaarida & ilaalinta Xuqxuuqda aadamiga bulsho waynta si loo fuliyo dhamaystirka mas'uuliyadaha.

Go'aanka Golaha guud ee Qaramada Midoobey ee 9A/47/160 ee September 1993 oo lagu boorinaayo Dawladaha iyo Ururada aan dowliga ahayn waxay ka gargaarayaan Soomaaliya dib-u-dhiska asaasiga adeegyada bulshada iyo dhaqaalaaha.

Iyadoo la dhowrayo dhaqanka caadooyinka iyo xeerka Puntland iyo hagidda ku dhaqanka mabaadii'da barakaca waxay kor u qaadaysaa xiriirka ka dhexeeya Ururada Caalamka iyo Dawlad Gobaleedka Puntland.

Sidaa awgeed Qaramada Midoobey iyo Dawlad Gobaleedka Puntland waxay wada jir u samaysteen xeer wada shaqayn ku salaysan saaxiibtinimo iyo iskaashi oo ah sida.

1. <u>Kaalinta iyo Masuuliyadaha guud</u>

1.1 Labada garab waxay heshiis ku yihiin ilaalinta , dhawrida iyo qadarinta dhamaan heshiisyada iyo shuruucda caalamiga oo ah:

- Heshiiska jineefa (Geneva Convention) ee 1949 iyo Borotokoolkeeda 1977.
- Heshiisyada caalamiga ee xuquuqda Aadimiga ee 1948
- Heshiisyada caalamiga ee xuquuqda rayidka ,siyaasada ,xuquuqda bulshada iyo dhaqalaha ee 1966.
- Heshiisyada ciribtirka dhamaan qaababka takoorka lid ku ah Haweenka ee 1979.
- Heshiisyada xuquuqda carrurta ee 1989.
- Heshiisyada laxiriira xaalada Qaxootiga ee 1951 iyo borotokolkeeda ee 1967.
- Heshiisyada ururka OAU ee 1969 oo si gaar ah u tilmaamaya dhibaatooyinka Qaxootiga Afrika .

1.2 Xeerka heshiiska wada shaqaynta ee Dawlad Goboleedka Puntland iyo Hay'adaha Qaramada Midoobay ma wiiqaayo , waxna uma dhimayo shuruucda Caalamiga.

2. <u>Kaalinta Dawlad Gobaleedka Punt land</u>

2.1 Kaalinta asaasiga ah ee Maamulka Puntland waa gargaaridda iyo ilaalinta bulsho weynta ku nool xuduudaha hoos yimaada Maamulka Dawlad Gobaleedka Puntland iyo hubinta, aqoonsiga xaquuqdooda asaasiga ah iyo xoriyadooda.

2.2 Hay'adaha Qaramada midoobey ee ka howl-galaya Puntland waxay maamulka ku gacan siinayaan u gargaarida & dhowrida Bulshada inta nugul.

2.3 Dawlad Gobaleedka Puntland waxaa mas'uuliyad buuxda ka saaran yahay ammaanka & ilaalinta Hay'adaha Qaramada midoobey Shaqaalahooda & hantidooda waxaana loo qeexayaa sidan.

- Hubinta amaanka,& nabad galyada Hay'adaha qaramada midoobey Shaqaalahooda iyo hantidooda.
- Hubinta xorriyadda & marinka Hay'adaha Qaramada Midoobey ee ka shaqeeya Puntland ee ka howl-galaya bulshada nugul si ay u qiimeeyaan baahidooda iyo kaalmo gaarsiinta.

- Hubinta in kaalmada caalamiga ah la gaarsiiyey dadkii loogu talagalay.
- Gacansiin iyo iskaashi Hay'adaha Qaramada Midoobey xagga ammaanka shaqaalahooda & nabad galyada xarunta Qaramada Midoobey, garoomada, goobaha la booqanayo, & howlaha mashaariicda ka socda Puntland.

3. <u>Kaalinta Hay'adaha Qaramada Midoobey</u>

3.1 Kaalinta Hay'adaha qaramada midoobey ee ka howlgala Puntland waxay siinayaan adeeg & ilaalinta Bulshada nugul. Kaalmadaas oo lagu badbaadinayo nolosha dadka laguna yareynayo dhibka gaaraya si ay u abuuranto jawi nabadeed oo degan.

3.2 Mabaaddii'da kaalmada aadamiga waxay ku salaysan tahay dhexdhexaad isu dheeli tir, Sinaan, ka qayb qaadasho, Xisaabtan, Nabad, dib u heshiisiin isu duwid & mideynta ujeedooyinka & mas'uuliyada Hay'adaha Qaramada Midoobey.

4. <u>Isu duwida</u>

4.1 Wasaaradda Qorshenta iyo Iskaasiga Caalamiga ah waa Xiriiriyaha Hay'adaha Caalamiga & Hay'adaha Puntland. Xafiiska wakiilka iyo isu duwidda kaalmooyinka ee Qaramada Midoobey waa xiriiriyaha Hay'adaha Qaramada Midoobey. Iyo Puntland iyadoo loo marayo Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga.

4.2 Hay'adaha Qaramada Midoobey ee ka mid ah heshiiska waxay la howl galayaan Wasaaradda iyo Hay'adaha Dowlada ee ay wada shaqeynta la leeyihiin iyagoo la saxiixaya Heshiisyada koobina la siinayo Wasaaradda Qorsheynta Iyo Iskaashiga Caalamiga ah.

4.3 A). Hay'adaha Qaramada Midoobey iyagoo wargalinaya waxay la tashi la yeelanayaa Wasaaradda Qorsheynta Iyo Iskaashiga Caalamiga, arimaha Qorsheynta, Mudnaanta, hirgalinta & madasha mashaariicda, warbixinta mashaariicda waxa la soo gudbinayaa saddexdii bilood mar.
B). Hay'adaha qaramadda midoobey waxay kala tashanayaan Wasaaradda Qorsheynta Iyo Iskaashiga Caalamiga kaalinta Qorsheynta, mudnaan-siinta, isu-duwidda, dabagalka iyo qiimaynta.

Sidoo kale waxay kala tashanayaan Wasaaradaha iyo hay'adaha Dawladda ee la howlgala arrimaha isuduwida, dabagalka iyo qiimaynta mashaariicda ay fulinayaan.

Hay'adaha Qaramada Midoobey, waxaa ka go'an inay kor u qaadaan xoojinta fulinta kaalinta Hay'adaha Dawlada.

4.4 Sanadkii labo jeer ayaa Wasaaradda Qorsheynta iyo Hay'adaha qaramada midoobey qabanayaan kulan looga hadlayo qorsheynta iyo isuduwida.

4.5 Ha'yadaha Qaramada Midoobey waxay Puntland ku yeelanayaan masuuliyiin talo iyo go'aan gaari kara.

4.6 Dhammaan workshobyada iyo Siminaarrada waxaa lagu qabanayaa Puntland oo aan ka ahayn kuwa gaar ah.

4.7 Mashaariicddu markay dhamaadaan waxa lagu wareejinayaa maamulka Dawladda ay khuseeyso haddii mashruuca loo baahdo in la fidiyo waxa wada jir dib u eegaya Wasaaradda Qorsheynta & iskaashiga Caalamiga iyo Hay'adaha Qaramada Midoobey

## 5. Mudnaanta Gaar ahaaneed iyo Xasaanadda

5.1 Hay'adaha Qaramada Midoobey waxay leeyihiin darajo, mudnaanta gaar ahaaneed iyo Xasaanadda sida ay qeexayaan heshiiyadii hore, gaar ahaan heshiisyada isla qodobadaasi waxay xoojinayaan ilaalinta Hantida iyo qalabka ay leeyihiin Hay'adaha Qaramada Midoobey ee ka shaqeeya Puntland.

5.1 A). Qalabka u soo degaya Hay'adaha Qaramada Midoobey waxay leeyihiin cashuur dhaaf aan xayiraad lahayn.

5. 1B). Qalabka cashuur dhaaf ku soo degay oo aan lagu dhaqmin dib ayey Hay'adaha Qaramada Midoobey u dhoofin karaan si loogu faa'iideeyo ummadda u baahan.

5.2 Haddii ay qalabka ka timaado dib-u-dhac, soo dejinta iyo dhoofinta waxaa ka wada hadlaya Maamul Gobolleedka Puntland iyo Hay'adaha Qaramada Midoobey

## 6. Shaqo Qoris

6.1 Iyadoo la tixraacayo Axdiga Qaramada Midoobey, Hay'adaha Qaramada Midoobey waxay u madax bannaan yihiin shaqo qorista muwaadiniinta Puntland iyo ciddii kale.

## 7. Darajada Shaqaalaha Qaramada Midoobey.

7.1 Dawlad Gobolleedka Puntland waxay qadarin siinaysaa Madaxda sare ee Hay'adaha Qaramada Midoobey sida heshiisyadu tilmaamayaan mudnaanta gaar ahaaneed iyo xasaanadaha la siiyey Madaxda Qaramada midoobey waa mid aan ka hooseyn tan la siiyo diblumaasiyiinta sida uu qeexayo sharciga caalamiga.

7.2 Khuburada u socota hawl-gaar ah oo Hay'adaha Qaramada Midoobey u soo idmaan inay hawlo ka soo qabtaan Puntland waxay leeyihiin mudnaan gaar ahaaneed iyo xasaanad.

7.3 Shaqaalaha reer Puntland ee u shaqeeya Hay'adaha Qaramada Midoobey iyo Addeegyada loo sameeyo Hay'adaha Qaramada Midoobey waxaa ku waajib ah canshuur bixin sida uu qeexayo dastuurka dalka. Xil ka ururinta canshuurta waa mid ay fulinayso Wasaaradda Maaliyadda. Hay'adaha Qaramada Midoobey waxay Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga u soo gudbineysaa tirada shaqaalaha u shaqeeya oo cashuurtu ku waajibto, Kirada guryaha, Baabuurta iyo Qandaraasyada IWM.

7.4 Madaxda iyo Khuburada Hay'adaha Qaramada Midoobey sida heshiisyadu tilmaamayaan cashuur kuma waajibto mushaharkooda iyo gunnadooda waxaa cashuur ku waajibeysaa adeegyada loo sameynayo.

7.5 Sidoo kale Madaxda iyo Khuburada Hay'adaha Qaramada Midoobey ee hawl gaar ah ku imaanaya Puntland waxaa laga dhaafayaa kharashka Visa-ha iyo waxyaalaha yaryar ee ay wataan.

## 8. <u>Wadaagga warbixinta</u>

8.1 Hay'adaha Qaramada Midoobey waxay war-bixinta Mashaariicda iyo Hawlgallada kala tashanayaan Masuuliyiinta Maamul Gobolleedka Puntland inta aan hawsha mashruuca la bilaabin.

8.2 Hay'adaha iyo Ururrada ka hawl-gala Puntland waxaa laga rabaa shuruudahan

- Hadafka iyo Ujeeddada Hay'adda ama Ururka.
- Dalka uu ka diiwaangashan yahay
- Xaruntooda
- Qaab-dhismeed Maamul iyo Shaqaalaha
- Mashruuca la qabanayo
- Meesha laga fulinayo
- Muddada mashruuca
- Kharashka Mashruuca
- Hantida Gaarka u ah oo ay la imanayso Hay'addu ama Ururku

## 9. <u>Xallinta Khilaafaadka</u>

9.1 Haddii khilaaf soo dhex maro Maamul Gobolleedka Puntland iyo Hay'adaha Qaramada Midoobey waxaa lagu xallinayaa:

a) Wada hadal dhexmara Masuuliyiinta Maamulka Puntland iyo Hay'adaha Qaramada Midoobey ee ku sugan Puntland.

b) Wada hadal dhexmara Xiriiriyaha dhanka Dawladda Puntland oo ah Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga iyo Xiriiriyaha Hay'addaha Qaramada Midoobey ee ku sugan Puntland.

c) Wada hada! dhexmara Masuuliyiinta Puntland iyo Xiriiriyaha Hay'adaha Qaramada Midoobey u fadhiya Nairobi.

9.2 Khilaafka ka dhasha qaabka shaqaaleynta iyo Shaqaalaha waxaa lagu xallinayaa xeerka u dhigan Hay'adda.

**10. Dhaqan Galka Heshiiska.**

10.1 Xeerka Wada shaqaynta wuxuu dhaqan gelayaa marka labada dhinac wada saxiixaan.

**11. Wax ka bedilid**

11.1 Heshiiska xeerka wada shaqaynta waxa wax laga beddeli karaa marka labada garab ku heshiiyaan in dib loo eego waxna laga beddelo.

**12. Dhaqan Beelka Heshiiska.**

12.1 Heshiiska Xeerka wada shaqaynta wuxuu dhaqan beelkiisu ku dhammaanayaa muddo lix bilood ah marka mid ka mid ah labada garab ku wargeliyo garabka kale in uu ka baxay heshiiskii sababo tilmaaman oo qeexan awgeed, Muddo lix bilood ah ayuuna jirayaa Heshiisku. Muddadaas wax uma dhimayo mudnaanta gaar ahaaneed iyo xasaanadaha Hay'adaha Qaramada Midoobey iyo Madaxda Dawladda.

Iyadoo ay goob joog ka yihiin labada garab oo ah kuwa awoodda u leh in ay heshiis kala saxiixdaan oo ah Maamulka Puntland iyo Wakiilka Hay'adaha Qaramada Midoobey, iyagoo matalaya labada garab ayey wada saxiixeen heshiiska wada shaqaynta, heshiiskaas oo ku qoran afka Ingiriiika

Heshiisku wuxuu ka dhacay Garowe 19-kii Bishii Feberaayo, 2007.

**Dhinaca Dawladda Puntland**

**Magac:** Cabdi Salaad Cali
**Xilka :** Wasiirka Qorsheynta & Iskashiga Calamiga

**Dhinaca Hay'adaha QM**

**Magac: Eric Laroche**
**Xilka : Isuduwaha Kaalmada Caalamiga iyo Arrimaha Bani'aadanimmada UN-ka**

PUNTLAND STATE OF SOMALIA MINISTER OF PLANING AND INTERNATIONAL CORPERATION
GAROWE SOMALIA